

Waxbarashada da'weynta

17^{ka} sebteembar oo ku aadan maalinta doorashada, waxaa go'aan laga gaari doona mustaqbilka dalka Iswiidan, xilkaasuna wuxuu saaran yahay adiga iyo aniga ba. Dhammaanteenna waxaa dusha naga saaran isla xilkaas. Codkaaga iyo kayga waa isku qiimmo. Haddaba miyaan kor u qaadna horumarka heerka sare ah, mise hoos ayaan u dhigna, anagoo karoonka shanaad ee canshuurta ka saarno khasnadda aanu wadajirka u leenahay? Miyaan horumarinaa hab-noleedka dalka Iswiidan – mise dusha ayaan u dhignaa?

Ummadda dhammaantood oo helay waxbarasho aanan dhammaad lahayn

Haddii aanu nahay xisbiga socialdemokratiga waxay nala tahay wax caadi ah in ummadda dhammaantood ay helaan waxbarasho aanan dhammaad lahayn iyado aanan la tixgelin qollada u qofku ka tirsan yahay. Xaaladaas waxay lagmaarmaan u tahay baahida maanta iyo tan soo socota ba ee ku saabsan shaqalaha tababbarsan. Sidaas awgeed, haddii aanu nahay xisbiga socialdemokratiga waxaan hirgelinay maalgelin waawayn ee dugsiyada gogoldhigga waxbarashada iyo dugsiya biloowga, hoose iyo dhexe . Qorshihii aqoon korsashada waxay waxbarasho u suurtagelisay dad tirodooda gaareeyso 800 000 qof. Waxaan ballaarinay jaamacadaha dalka ku yaalo, waxaana qorsheeynay afar jaamacadood, bilaawday labo jaamacad cusub, waxaan kalo aad uu ku kordhinay miisaniyada cilmibaarista.

Waxbarashada waa xaq ummadda dhammaantood ay lee yihiin. Aqoonta way ballaarataa markii dadka isdhaafsanaayo ay badan yihiin. Sidaas awgeed waxaan u hawlgalnaa sidii dadka aanan sidaas wax u soo baran ay u helaan fursad ay wax ku bartaan. Waxbarashada da'weynta waxaay kaalin weyn ka qaadataa ciribtirada heerarka aqoonta.

Dowladda xisbiga socialdemokratiga waxay sannad kasto siisaa maamulada degmooyinka lacga dhan 1,8 biljan karoon sidii ay u suurtageliyaan boosas tiradooda gaareeyso 80 000 oo da'weynta wax ku



bartaan wakhtibuuxa. Mudnaanta koowaad ee helida boosaska waxaa la siiyaa dadka aanan sii fiican horey wax u soo baran. Maalgelintaas la'aanteeda da'wynta ma heli lahayn fursad ay wax ku bartaan ama ku aqoonkorsadaan.

Sida weliba loo dhiirigeliyo da'weynta aanan sii fiican horey wax u soo baran, teeda kale waxay dowladda xisbiga lacag labo biljan ka badan ugu talagashay kaalmo-dhaqaaleedka waxbarashada ee dheeraadka iyo gaarka ah. Macnaheedu waxay tahay in dad tiradooda gaareeyso 25 000 qof, kuwaaso qaarkood ah ama noqon karaan shaqolaaweyaal, lagu hogaamin karo waxbarasho, iyadoo la tiirsanaayo kaalmo-dhaqaaleedka waxbarashada taaso u dhigmata kaalmo-dhaqaaleed ah boqolkiiba boqol muddo hal sano ah. Kaalmo-dhaqaaleedka waxbarashada wuxuu lagamaarmaan u yahay sidii loogu hortegi lahaa heerarka aqoonta ee dadweynaha.

Haddii aanu nahay xisbiga socialdemokratiga waxaanu doonayna in annu kordhino maalgelinta xirfadbarashada, heerka dugsiga sare iyo heerka ku xiga ba. Waxaan awood dheeraad siin doona barnaamijyada gogoldhigga barashada xirfadaha ee dugsiyada sare. Tirada u qalmida barnaamijyada gogoldhigga barashada xirfadaha waxay 1996 ahayd 846 qof, sannadkii 2005 waxay ahayd 27 000 arday. Imminka dadaalkaygii halkaas ayuu ka sii dhaqaaqayaa, waxaan awood dheeraad siinayna waxbarashada da'weynta iyo barashada xirfadaha ee degmooyinka maamulaan. Da'weynta waa in ay helaan fursad ay ku bartaan xirfad sida dhallinyarada dhigata dugsiyada sare.

Waxaan kalo doonayna in an sare u qaadno aqoonta dadweynaha. Tiro ka badan 1,5 maljuun oo rag iyo dumar ba isugu jira ayaa sannad kasta ka qaybqaata dhaqdhaqaaqyada isbahaysiga waxbarashada. Dad tiradooda gaareeyso 100 000 waxay ka qaybgalaan tababarro dheer iyo kuwa gaaban ba ee jaamacadaha ummadda. Aqoonta dadweynaha waxay muhim u tahay waxbarashada aanan dhamaadka lahayn.

Wax ku bediladeeda

Siyaasadayda ku salaysan mabda ummad dhammaantood oo helay waxbarasho aanana dhammaad lahayn, waxaa ka soo horjeeda siyaasadda isbahaysiga midigta ee xisbiga moderaterna u hogaamiyo. Xisbiga moderaterna wuxuu doonayaa in u wax ka dhimmo kaalmo-dhaqaaleedka dowladda ee loogu talaggalay waxbarashada da'weynta. Taaso keeni doonto in ugu yaraan booskii saddexaad ba ee waxbarashada da'weynta u ciribtirmo. Waxay kaloo doonayaan in ay ciribtiraan kaalmo-dhaqaaleedka waxbarashada gaaraka ah, kaalmadaas oo aad wax ugu tarto dadka ugu dhaqaale liita. Waxay kalo doonayaan in hoos u dhigaan kaalmada aqoonta ummadda, taaso keeni doonto in booskii saddexaad ba ciribtirmo.



Dalka Iswiidan waa innuu aqoon ku kora. Iyadoo la tiirsanaayo ciribtirida heerarka aqoonta ee ummadda ayaa loogu hortegi karaa heerka dhaqaalaha iyo bulshada kala duwan. Sidaas awgeed, haddii aanu nahay xisbiga socialdemokratiga waxaan doonayna in an maalgenlinno waxbarashada da'weynta, siiba kuwa horey aqoontooda u liidatay.

Dalka Iswiidan anagu aanu maamuli doono waa loo dhan yahay, adigu-se dalkee dooratay?

